SOMALI SOUTH CENTRAL NON STATE ACTORS
(SOSCNSA)

# CONSULTATION MEETING ON AID EFFECTIVENESS AND SERVICE DELIVERY

# KULANKA WADA TASHIGA SAMAFALKA IYO ADEEGA BULSHADA

27th December 2014

SOSCNSA MEETING HALL

# SOMALI SOUTH CENTRAL NON STATE ACTORS (SOSCNSA)

## SOSCNSA'S AID EFFECTIVENESS AND SERVICE DELIVERY MEETING

AJENDA KULANKA: SAMAFALKA IYO ADEEGA BULSHADA

| Sabti 27 December 2014 | |
|---|---|
| 09:00 – 9:30 | ▶ Soo dhaweynta martida kulanka<br>▶ Aqrinta Aayadaha Quraanka – xubin ka qeybgalayaasha<br>▶ Furitaanka shirka si arasmi ah<br>Agaasime. Xasan Axmed Sadiiq |
| 09:30 – 10:30 | ◆ Soo jeedin: ku saabsan SOSCNSA iyo waxa ay qabato, Cadulaahi Shiikh Adan<br>◆ Xaalada ku saabsan samfalka iyo adeega bulshada ee xilagaan<br>Team leader Eng. Maxamed Axmed Nuur (porro) |
| 10:30 – 11:00 | NASASHO IYO SHAAH |
| 11:00 – 12:00 | Dood furan: talo bixin iyo dardaaran<br>Ka qeybgalayaasha kulanka |
| 12:00 – 12: 30 | ✓ Xiritaanka kulanka wadatashiga<br>Gudomiye. Cabdullahi Maxamed Shirwac |

# HABSAMI U SOCODKA KULANKA WADA TASHIGA EE SAMAFALKA IYO ADEEGA BULSHADA

**SIDA** jadwalka ku qoran, waxaa kulanka wada tashiga lagu furay aayado quraanka kariimka ah oo uu akhriyay Eng. Sidow Xasan Mahdi, iyadoo ka soo qeybgalayaasha kulanka si fiican ugu khashuuceen aayada quraanka uu akhriyay.

**Waxaa** ku xigay isbarasho, ay xubnaha ka soo qeybgalay kulananka hal hal u is taageen, iyadoo xubin walba ay sheegeeyso magaceeda, goobta ay ka shaqeeyso iyo hay'adda ay ka socoto, si la isku barto, taasina waxay u qabsoontay si wanaagsan oo xubin walba ay baratay magaca qofka kulanka kula jira iyo hay'adda uu ka socdo.

**Intaa** ka dib, waxaa kulanka si toos ah u furay Agaasimaha Dalada SOSCNSA, Mudane. Xasan Axmed Sadiiq, Agaasimaha ayaa ku soo dhaweeyay dhamaan ka soo qeybgalayaasha kulanka sida sharafta leh ee ay u adeeceen in ay yimaadaan kulankaan qiimaha badan ee logy yeeray. Agaasimaha waxa kaloo u mahadceliyay guddiga Samafalka iyo Adeega Bulshada oo kulankaan soo diyaariyay.

Intaa ka dib, waxa uu si tafatiran ugu warbixiyay Daladda SOSCNSA ujeedada loo aasasay, waxa ay qabatay iyo waxa ay rabto in ay qabato mustaqbalka, waxa uu yiri, Dalada waxay u shaqeeysaa kana shaqeeysaa Arimaha bulshada iyadoo leh bulsho badan oo ku xiran, waxaa xubin ka ah dhamaan Bulshada Rayidka ah, Xirfadleeyda iyo private sector oo laf dhabar u ah.

Dalada SOSCNSA waa Dalad ay ku mideeysan yahiin inta ka soo hartay Dowlada, kuwaas oo ah:

a) Golaha Wasiirada ( Fulinta);

b) Sharci Dejinta ( Golaha Shacabka);

c) Garsoorka;

d) Madaxtoooyada.

Inta ka soo hartay waa Bulshada Rayidka oo ay ku mideeysan yahiin Dalada SOSCNSA, waana:

1) Private Sectors;

2) Profit Makers (Adeeg bixiyayaasha);

3) Non-profit makers (NGOs)

Dalada SOSCNSA waxay ka howl gala saddex kooxood shaqo (Three thematic working groups) oo kala ah:

1) Aid effectiveness and service delivery team;

2) Public accountability;

3) Peace building.

Saddexdaas kooxood waxay qabtaan howlaha loo xil saaray, waxayna leeyahiin xubno firfircoon oo howlahaas u qabta, maanta waxaan marti u nahay kooxda Samafalka iyo adeega Bulshada oo aan ka sugeeyno in ay noo soo bandhigaan aqoonta iyo cilmiga ku saabsan samafalka iyo adeega bulshada aan ku soo dhaweeyo madaxa kooxda Eng. Maxamed Axmed Nuur Porro, ku soo dhawaaw.

Eng. Porro ayaa marka hore u mahadceliyay dadka ka soo qeybgalay kulankaan qiimaha badan ee ku saabsan Kulanka wadatashiga Samafalka iyo Adeega Bulshada, Injineerka ayaa si fiican u soo bandhigay cashar ku saabsan Samafalka iyo adeega Bulshada, isagoo meelo kala duwan ka tusiyay, samafalka iyo adeega bulshada casharka uu soo diyaariyay waa sidaan:

**SAMAFALKA IYO ADEEGA BULSHADA**

**DULMAR**

Burburkii dowlada dhexe ee soomaaliya, waxa burburay dhamaan goobahii adeegayada bulshada isla markaasna waxaa meesha ka baxay hay'adahii adeegayada bulshada ee ka jiray dalka soomaaliya. Arimaha aan soo sheegnay waxaa ay saamayn balaaran ku yeesheen nolasha dadweynaha soomaaliyeed sida:

- Ku tiirsanaan kaalmo bani'aadam (Humaniterian Aid);
- Nafaqo dari iyo caafimaad xumi;
- Waxbarasho la'aan soo wajahdo ubadka soomaaliyeed;
- Hoos u dhac ku yimaada wax soo saarka dalka;
- Dhibaatooyin xaga biyaha iyo korantada;
- Qax fara badan gudaha dalka iyo dibadaha iyo waxyaabo kala

Si wax looga qanto arrimaha aan kor ku soo xusnay, waxaa dhabarka u dhigtay Hay'ado Samafal Maxali ah iyo kuwa Caalami ah dhanka Samafalka, Adeegayada bulshada waxaa inta badan gacanta ku haaya shirkado gar ah (Private sector)

Marka waxaa is weydiin leh, ma yihiin adeegyada samafalka iyo adeega bulshada:

1. Kuwa wax ku ool ah haqabtiraya baahida bulshada?
2. Waa maxay caqbadaha hortaagan tayeynta adeegyadaas?
3. Sidee looga bixi karaa dhibaatooyinka ka jira dhanka adeegyadaan?

Saddexdaan su'aal oo aan kor ku soo xusnay ayaa ah in samafalka iyo adeega bulshada ee dalada SOSCNSA iyo dhamaan ka qaybgalayaasha shirkaan wada tashiga ah aan maanta ku kulansan nahay in aan isla falanqeyno xaaladaha samafalka iyo adeegayada bulshada xilligaan taagan, isla markaasna aan ka soo saarno fariimo iyo talooyin wax ku ool ah aan u gudbino hay'adaha dowlada waxa ka qaban kara talooyinka laga soo saaro kulanka wada tashiga ah.

Intaa ka dib, waxaa bilowday doodii lagu falanqeynaayay saddexdii su'aalo ee loo soo bandhigay ka qaybgalayaasha kulanka, iyadoo dooda u bilaabatay sida ay u kala horeeyaan su'aalaha la soo bandhigay.

**FIRKRADAHA KA QAYBGALAYAASHA KULANKA:**

Ka soo qeeybalayaasha waxay isku raaceen in aysan jirn wax ku ool la taaban karo ee haqabatiri kara baahida bulshada, marka laga eego dhinaca caafimaadka, adeega biyaha, waxbarashada, iyo dhamaan adeegyada lama huraanka ah ee bulshada u baahan tahay waxaana loo kala qaaday sidaan:

**Dhinaca Biyaha:**

Dhibaatada ugu weyn ee bulshada haysta waxaa ka mid ah biyaha, meel walba waxaad maqleeysaa biyo ayaa dhib ka taagan yahiin, marna waa biyo la'aan, Abaar joogta ah, marna waa fatahaad iyo daadad wax walba baa'biyay oo qax iyo barakac sameeya. Biyaha waxaa u baahan Beeraha, Xoolaha, Dadka iyo dhamaan inta nool. Biyaha la cabbo ma aha mid nadiif ah, waxaad arkeeysa ceelal laga qodaayo meelo aan ku habooneen oo bulaacado ama musqulo u dhow kuwaas oo siimoow ku yeesha ceelka biyaha laga cabo, taasoo keenta wasakhow iyo xanuuno joogta ah ee bulshada, Biyaha waxaa gacanta ku haya dad ganacsato ah oo ka fikira danhooda keliya, ma aha dad biyo yaqaano, waa NGO local ah oo

mashruuca soo helay, kama fakiro caafimaadka bulshada iyo dad weynaha waxa uu yaqaanaa waa ganacsigiisa iyo sidii dhaqaalo ku heli lahaa.

Sida aan ka socono, Adeega Bulshada waxaa bixiya State actors (Dowlada) ama Non State actors (kuwa dowlada aheyn). Waxaa kaalmeeya Dowlada iyo Deeq bixiyayaasha (Donors), si loo ogaado wada shaqeeynta u dhaxeeysa labada qeybood, taasina lama hayo. Maxaa ka dhashay wada shaqeeyn la'aantaas? Waxaa ka dhasha in ceel laga qodo meel aan ku habooneen, biyaha ceelka laga soo saaray ma yahiin biyo caafimaad leh oo la cabbi kara misa waa kuwa cudur iyo dhibaato bulshada ku soo kordhiya?

Inta wax tabta ayaa mar warlba wax is weydiisa, iyagana ma helaan habkii ay wax ku gaari lahaayeen, ama qaabkii ay xog badan ku heli lahaayeen? Dalka waxaa dal ku ahaan karaa in uu dowlad helo, oo wax walba daboosha. Anaga waxaan bulsho ku nahay in aan helno adeegyada bulshada ay u baahan tahay.

Adeega bulshada waxa laga rabaa waa dowlada, sida aan ognahay dowlada hal doolar kuma bixiso adeega bulshada sidaa darteed dayacaas waa mid meesha yaala, waxaad arkeeysaa khashinka daadsan, laamiyadii hadda Turkiga inoo sameeyay, cid ka qaadeeysa ma laha, nin walboo meherad ku leh wadada waxa uu khashinka ku soo daadinayaa laamiga la soo horeeya intii uu meel ku shubi lahaa si loo qaado.

Wasaarada Arimaha Gudaha waxa ay qeeybisaa oo keliya Deeqaha ay keentay Turkiga, ee ayada miisaaniyadeeda ama jeebkeeda wax kama bixiso, samafalka waa halkee albaabkiisa laga soo galo, ayaa ah su'aasha dadweynaha is weydiiyaan, waxaad arkeeysaa in wasaarada arimaha gudaha, madaxtooyada, iyo wasiirka kowaad xafiisyadooda ay ka soo baxaan awaamiir iyo howlo is barbar yaacay, ma jiro siyaasad guud ee qaraneed ( national policy).

**Dhinaca Caafimaadka:**

Samafalka waa wax baahsan oo aan laheyn hal albaab, Albaabadii dowlada ayaa ka xiran bulshada si ay ula xisaabtamaan. Jidadka burbursan waxay ka xun yahiin dhinaca dowlada hoose, dowlada meel loo aado ma leh.

Biyaha aan dadka buka ku dhaqno waa biyaha keliya ee la heysto iyagaa la cabaa, dadka lagu dhaqaa, lagu qubeeystaa, wax ku karsanaa, wax walba ayaan ku qabsanaa. Kolariin waxa ay tahay lama yaqaan, waxaa lagu shubaa ceelasha, si loo isticmaalo ayaa su'aal ka taagan tahay? Shaqaale badan oo caafimaadka ka shaqeeya ayaa ku dhintay isticmaalka kolariinta, cid ka mas'uulka ah ma jirto.

Dugsiga Xasan Qariidi oo ku yaala dhinaca waqooyi ee degmada Howl Wadaag, wuxuu ku dhex yaalaa laba buurood oo khashin ah, ardayda dugsiga dhigta waxaa kala qariya tixsiga oo ardayda ka badan, kaaso keenaya cuduro iyo caafimaad xumo, intii ardayda waxbarasho iyo aqoon heli lahyeen, waxaa kala khariya tixsiga ka soo duulaya labada buur ee khashinka ah ee halkaas lagu soo shubo maalin iyo habeen, cid xil iska saartana ma jirto oo u naxeeysa ardaydaas caafimaadkooda.

**Dhinaca Waxbarashada:**

Sal fadhiyaa suuf jiida ayaa lagu bilaabay qeybta waxbarashada ee adeega bulshada. Waxbarasho waxaa asal u ah saddex sheey oo kala ah: Arday, Manhaj iyo Macalin, laba waa la heli karaa, midka ugu daran oo aan la heli Karin waa Macalinka, Macalin la'aan waxbarasho ma hirgaleeyso mana hormareeysa, inta aan heysano sidii aan u hormarin laheyn aan ka fakirno. Dowlada waa anagoo shacab ah. Nin rabo in cunagiisa macalinimo u diro ma jiro, side waxbarashada ku hormarineeynaa?

In ka badan 4000 macalin ayaa wax dhiga, 82% waa IT ( information technology) oo taqasus macalinimo ma laha, in ka badan 100000 (boqol kun arday) ayaa dalka wax ka barata hal maalin waa la isku wada keeni karaa, wax walba waa loo adeegsan karaa, laakin macalimiintii wax u dhigi laheyd ayaa la iska rabaa? Sida looda bixi karo waa in aan tashanaa.

Beri hore, London ayaa duntay, waxaa la yiri qof walba waa in qof wax bara, si ayaga dalka u dhisaan, dadka dambe aan u beer falno ayaa wanaagsan oo aan tusaalaha London raacno.

Dugsi tababar macalin ayaa jira waana laba sano, waxaa ardayda la baraa afarta maado ee cilmiga ah, Xisaab, fiisikis, Kimistari iyo Bayology, ardayga ugu wanaagsan marka uu hal sano dhigto ayuu isaga tagayaa, waa dhib meesheeda

taagan, kuwa dhameeystana jaamacadahii ayaa ugaarsi ku haya. Jaamacadah waa diyaar, waxa ay weysan yahiin arday ay macalinimo wax uu baraan.

Ardayda hadda waxbarato waa 22%, ee kama hadli karno wax korodhka ee aan ka hadalno sidii kuwa dhiman oo ah 78% sidaan wax ugu tari laheyn, jahliga ugu saari laheyn. Waxaad arkeeysaa in ka badan 80 arday oo fadhiya hal fasal oo jiingad ka sameeysan, kuleel ah, ardayda ma awoodaan in ay arkaan macalinka iyo sabuuradaba, taasina waa mushkulad heysata waxbarashada dalka.

Aqoonta waa in ay waxtartaa, oo ay muuqataa, Aqoonta waa waajib risaalo ah oo qof waliba saran ee lalama cabsado, waa in la fidiyaa si umadda u gaarto. Aqoon horteed igaar ahaaw ayaa la yiri, dadka aqoonta leh waa in gacan siiyaan kuwa aqoon darida heysato.

**2- Waa maxay caqbadaha hortaagan tayeynta adeegyadaas?**

Waxaa la soo taxay dhamaan caqabada hortaagan adeega bulshada waana sidaan:

Xaafadaheena biyo aan isticmaalno lama cabbi karo, hadii aad hadasho cid kuu bedelaysa ma jirto waan ku qasbanahay inaan biyahaas iska cabno. Bulshada way qasban tahay waxa ay heysato waa in ay qaadataa waa cilada kowaad ee meesha taalo, waa dadka ayaa awoodii laga qaaday, dowladiina awood ma leh.

Kartidii dowlada ayaa meesha ka maqan. Aqoon daro haysata kuwa ku howlan adeega bulshada. Agabka loo baahnaa oo aan meesha jirin. Adeeg ku filan oo furfuran ma jiro.

Hay'addaha bulshada oo aan abaabulneey oo iyadana caqabad ah. Qof ganacsi rabo in uu adeeg fiican qaban Karin waa mid caqabad ah. Dugsiyada dowlada ayaa laga kireenayaa qof NGO ah, isla markaana qof kale kiro ku jira ayuu la ficiltamayaa, inta uu qaado ayuu ardayga ka qaadayaa, mana fiirinaayo in uu isticmaalaayo agabkii dowlada oo bulshada laheyd, waa caqabad heysata waxbarasha dowlada. Ma jiraan dadka in ay u hadlaan adeegooda ay leeyahiin.

Ma jiro dad lala tashado, marka wax loo qabanaayo, iyo waxa loo qabanaayo bulshada. Ma jiro dad lagala tashado waxa ugu wanaagsan waa nabadda, cid kaala tashato ma jirto, sidii la rabo ayaa lagaa dhiganayaa.

Shacab aan canshuur bixinin side adeegada wax looga qaban karaa? Waa su'aasha mar walba hortaagan bixinta adeega bulshada, caqabadna ku ah, sidaa darteed waa in isbedal la sameeyaa si adeega bulshada ay dowlada u bixiso.

Dowlada ma jirto hal waax oo leh siyaasad wax loogu qabto adeega bulshada, waxaa haboon in ay sameeyso siyaasad guud ee wax lagu qabto. Hay'addaha Bulshada rayidka oo aan abaabulneen ayaa iyadana ah caqabad weyn oo hortaal adeega bulshada.

Shacabka awood ma leh ee waxaa jira danleey awood ku leh qabiil ama lacag oo caqabad ku ah adeega bulshada.

Aqoon la'aan ayaa aabo iyo hooyo u ah wax walbo xumaado ee ku yimaada adeega bulshada.

**3- Sidee looga bixi karaa dhibaatooyinka ka jira dhanka adeegyadaan?**

Hadaan nahay somaaliya waxa aan eegnaa waa caqabadaha iyo dhibaatooyinka, ma eegno fursadaha aan heysano iyo sidii looga faa'ideeysan lahaa. Dadweyne ayaan heysanaa oo aan si walba u adeegsan karnaa hadii aan aabaabulno oo aan wacyi gelino.

Dadka waxaa heysta cabsi, midda kale waxay u  qeybsan yahiin joog iyo jiif, mid qabiil, mid diin, mid fikrad, mid caqiido. Awood la'aanta waa baahidda jirta, qofka ma imaan karo goobta looga yeero. Dalka waxa jooga danleey awood leh oo qaadatay dhamaan awoodii shacabka, marka aan is weydiino side baa dadkaan awood loo siinayaa?

Waxay ila tahay in sida dadka awooda loo siinaayo in ay tahay wacyi gelin joogta ah, sidaas ayaa awooda shacabka loogu soo celin karaa. Marka aan rabno in aan awood siino shacabka waa in aan marka hore isbedelnaa oo naga muuqataa isbedel wanaagsan ee gudaheena ah, si aan u muujino waxa aan rabno in aan bedelno.

Waxaa haboon in la sameeyo sector policy si loo helo isku xirnaan, wax lagu bedelo. Sidoo kale waxaa haboon in loo ololeeyo sidii loo sameyn lahaa siyaasad hagta adeegyada bulshada.

Fursadaha aan heysano ma ka faa'ideeysano, waxaa haboon in laga faa'ideeysto, waxa nagu dhacay ma qorno, waxaa nagu socda fad ama ha fadin, cid walba waxa ay rabo ayay naga fushataa, cid shacabka u daneeyso ma jirto.

SOSCNSA waxaa dhisay sandkii 2008, meel walba ayaa laga aqoonsan yahay, Puntland waxay leedahay PUNSA, Somaliland waxay leedahay SOLNSA, kuwaasi awood ayay leeyahiin, anaga cabsi ayaa na heysa. Qabiil in la iska fogeeyo ayaa wanaagsan si aan awoodeena u midoowdo, fikirka ah in qabiil meel la iska dhigo, awoodiisana u adeegsano wax dhisid ayaa nagu haboon si aan hormar la mid ah kuwa ay gaareen walaalaheena gaarno.

Deeq biyayaasha nama dhageeystaan, sababto ah ma siino wax xog ah oo isku haleeyn karaan, cidii xog rasmi ah heyso ayaa lala soo xiriiraa lana dhageeystaa, waa in la helaa meel xog laga helo oo lagu soo higto, hadii la rabo in samafalka iyo adeega bulshada meel wanaagsan maro.

Ururada Bulshada waa awood ururs an oo wax tar leh, sidaa darteed waa in ay isu arkaan awoodaas, oo ay mideeyaan xoogooda, hal meel ugu soo wada jeestaan, lehaadaan hal magic, hogaan iyo albaab laga soo galo si ay meel iskugu raacaan.

**Gunaanadka iyo talo bixinta kulanka wadatashiga samafalka iyo adeega bulshada:**

1. **Hadaan nahay bulshada rayidka ah waxaan soo jeedinaynaa in la helo siyaasad lagu hago arimaha Gargaar.**
2. **Waa in dhisaa gudi ka shaqeeya samaynta Siyaasad lagu hago arimaha Gargaarka iyo adeega bulshadaa.**

Ugu dambeeyntii kulanka wada tashiga samafalka iyo adeega bulshada waxaa soo gunaanaday Gudoomiyaha Dalada SOSCNSA Dr. Cabdulaahi Maxamed Shirwac, isagoo u hambalyeeyay dhamaan ka soo qeybgalayaasha kulanka waqtiga qiimaha leh ee ay soo bixiyeen, sida macquulka ah ee ay ugu doodeen, qodobadii laga doodaayay, fikradaha wanaagsan ee ay soo bandhigeen iyo talooyinka waxtarka leh ee ku soo kordhiyeen kulanka oo runtii guddiga Samafalka iyo adeega bulshada si fiican ugu faa'ideeysan doonaan, ayaan u mahadcelinyaa dhamaantiina howsha nuxurka leh ee aad manta qabateen.

Waxaan ku soo xirayaa hadalkayga, in aan la nimaado wax qabad muuqda haba yaraadee, hadii manta aan wax ka qabano dugsiga Xasan Qariidi wasaqda iyo khashinka dhinacyada ka yaalo, oo aan badbaadiyo ardaydaas waa wax tar aad u muuqda oo aan sharaf iyo sumcad ku heleeyno, marka aan ku wargelino qolooyinka caafimaadka sidii arintaas wax looga qaban lahaa, aan u tagno gudoomiyaha degmada, ama duqa magaalada ama guddiga caafimaadka si ardaydaas cudurka ugu badbaadino.

In ka badan laba milyan qof ayaa raashin heysan, sidii wax loogu qaban lahaa aan wax ugu qabano, marka hore anaga aan isku tashano oo aan wax qabsano ka dibna bulshada kale aan wax u qabno.